# Geedka Giant Hogweed

*Heracleum mantegazzianum* **Ka Tirsan Qoyska Parsley**

**Cawska Sunta ah ee Heerka A: Dabargoyn ayaa la Rabaa**

## Tilmaamo lagu Aqoonsado

- Geedka weyn wuxuu ugu badnaan baliciisu gaaraa 2 foot, ubaxa sida dallada u eg waxaa si isku urursan uga buuxa ubax yaryar oo cad
- Wuxuu dhererkiisu gaaraa 8 ilaa 15 feet marka uu ubaxa leeyahay
- Wuxuu leeyahay, jirid dhexda ka duleesha oo dhuuban oo dhexroorkeedu yahay 2 ilaa 4 inches isagoo leh guntin kor u baxsan oo madow guduud xigeen ah-madow khafiif ah iyo timo cad (wuxuu u eg yahay qodax fiiqan laakiin timo ayuu leeyahay)
- Caleemaha waaweyn ee isku urursan waa kuwo kala qaybsan, iyagoo balacoodu gaaro 3 ilaa 5 feet
- Caleemaha ku yaala hoostu waxay leeyihiin dhanka feeraha u eg laakiin dusha sare ee caleemuhu timo ma laha
- Iniinyaha qiyaastoodu waa 3/8 inch, waxayna leeyihiin miro qalalan oo soo qallooca oo leh baalal iyo dhuun bararsan qoyan oo midabkeeda cawlan yahay



*Waxaad bartamaha bisha Maajo ilaa Luulyo raadisaa, ubaxa weyn ee dalada u eg, ee leh ubaxa cad.*

## Bayoolajiga

Sida caadiga ah geedkan waa mid muddo badan jira, iyadoo ubuxu soo baxo sanadka 3-aad ama ka dib isagoo caadiyan dhinta markuu ubuxu ka soo baxo ka dib. Iniinyaha baalasha leh ee ay kala bixiyaan biyuhu, dhaqdhaqaaqa carrada ama xayawaanku; waxay noqon karaan kuwo ka muuqda carrada muddo ilaa 10 sano ah.  Dhirtu waxay soo baxdaa bilowga guga. Ubuxu wuxuu soo baxaa bartamaha bisha Maajo ilaa Luulyo dhexdeeda, iniinyuhu waxay bilaabaan in ay samaysmaan Luulyo dhexdeeda.

## Saameynta

**Mid sun ah.  Dheecaanka geedku wuxuu keeni karaa finanka maqaarka iyo xagtin joogto ah.** Wuxuu bara bixiyaa cawska la rabay, ee dhulka loogu yimid iyo dhirta miraha beeraha iyadoo ay sababtu tahay bixida uu sida aadka ah u baxo. Wuxuu kordhin karaa nabaadguurka webiga iyo meelaha taaga ah isagoo beddelaya carradii illaalinaysay iyo dhirta markasta cagaaran iyo dhirta kaynta ah.



*Jiridu waa mid guduud-xigeen ah oo meel soo buuran oo kor u kacsan iyo timo cad.*

## Faafidda

Asal wuxuu ka soo jeedaa buuraha Caucasus Mountains wuxuuna Waqooyiga Ameerika ku yimid isaga oo dhanka wax qurxinta loo isticmaalayay. Inta badan waxaa laga helaa meelaha magaalooyinka, wadooyinka agtiisa, barxadaha aan la daryeelin iyo guryaha maran. Wuxuu jecel yahay carrada qaniga ah ee qoyan isagoo uu ku bixi kara iftiinka kala duwan. Isagoo soo saaraya iniinyo aad u badan mugdigana u adkaysta, wuxuu si dhakhso ah ula wareegaa webiga iyo hareeraha dooxyada, dhulka qoyan iyo togaga kaymaha leh.

## Maxaad Samayn Kartaa

Barnaamijka Xakamaynta Cawska Sunta ah ee Degaanka King wuxuu si firfircoon iskugu dayayaa in uu geedka giant hogweed ka ciribtirto meel kasta oo ku yaala degaanka. Hawsha dhankaaga ka wad adigoo geedka giant hogweed ka fiirinaya hantidaada. Joojinta iniinyaha soo baxay iyo baabi'inta geedaha hada jira, ku baahida ay dhulka ku baahaysaa hoos ayuu u dhici doonaa ama waa la tirtiri doona muddo marka la joogo. Haddii aad xakamayn kari waydo geedkaaga giant hogweed, nala soo xiriir si aad u heshid caawimaad.  Fadlan soo sheeg wixii aad aragtid.



*Caleemuhu waa kuwo waaweyn oo oo kala qaybsan.*

## Hababka loo Xakamaynayo

Haddii aad ogaato in hanti aad leedahay uu baxo geedka giant hogweed, waxaad doorataa hababka loo xakamaynayo ee soo socda mid ka mid ah ama labadooda. Taxadar muuji. **Geedkan wuxuu leeyahay khatar caafimaad oo weyn.** Waxaad xirataa dhar sax ah, kabo, iyo waxyaalaha indhaha lagu illaaliyo marka aad isku dayayso in aad qaato tallaabooyin aad ku xakamaynayso. **Iska illaali in uu jirkaaga soo gaaro. Biyaha dheecaanka ah ee ku jira caleemaha iyo jiridu wuxuu keeni karaa gubasho, finan iyo xagtin.**

***Su'aalo?***

Barnaamijka Xakamaynta Cawska Sunta ah ee Degaanka King:
**206-477-WEED kingcounty.gov/weeds**

King County

*Gacanta laga qabanayo:*

Geedaha qaangaarka ah waxaa lagu soo bixin karaa gacanta. Dhulka ka soo qod ugu yaraan 4-6 inches ee bartamaha xididka. Geedaha yaryari waa kuwo adkaysi badan. Marka ay si buuxda dhulka ugu baahaan, geedaha yaryar ee iniinyaha sidoo tooska uga soo baxa waxay tiradeedu noqon kartaa boqolaal waxaana laga yaabaa in ay kala daadato marka xoog loo soo goynayo iyadoo ay ugu wacan tahay carradda oo qabsanaysa, taasi oo xididka ka dhigayso in sii wado koritaanka. Waxaad xaqiijisaa in aad bac ku rido ubaxa iyo geedaha iniinyaha madaxa ku leh ku rido qashinka.

*Farsamo:*

Jarida la jarayaa waxtar u yeelayn mayso xakamaynta ee muddada dheer. Ha isticmaalin mishiinka cawska lagu jiro ama ha jarin iyadoo la xiran yahay dhar la isku illaaliyo iyo kabo maahane—dheecaanka ka yimaada geedku wuxuu keeni karaa gubasho.



***Ka taxadar: dheecaanka ku jira jiridu wuxuu keeni karaa finan iyo xagtin.***

*Kiimikada:*

**Waxaad raacdaa dhammaan sharciyada iyo xeerarka khuseeya ee ku saabsan isticmaalka kiimikada wax lagu buufiyo ee goobtaada, isla markaana raac dhammaan astaamaha la raacayo.** Kiimikada wax lagu buufiyo ee Glyphosate waa mid waxtar leh, laakiin waa kiimiko aan wax gaar ah loogu talagalin oo wax lagu buufiyo waxay sidoo kale dili doontaa cawska caadiga ee ka baxa meelaha la buufiyay. Meelaha qaawan oo aanay waxba kor saarnayn waxbaa mar dambe ka buuxsami sidaa darteed dib u beer dhir ku habboon goobta. Kiimikida wax lagu buufiyo ee Triclopyr ayaa sidoo kale ah mid waxtar leh. Waa kiimiko gaar ah oo wax lagu buufiyo oo kaliya loogu talagalay in ay wax ka qabato dhirta caleemaha waaweyn leh, iyadoon wax dhibaata ah u keenaynin inta badan cawska. Kiimikada wax lagu buufiyo si firfircoon ugu istimaal dhammaan caleemaha iyo jirida korkeeda ee dhammaan dhirta baxaysa; jirida ha soo goyn ka dib markaad isticmaasho kiimikada wax lagu buufiyo iyadoo dhirta ka joojin doonta in ay soo nuugto waxyaalaha kiimikada ah. Meelaha ay iniinyuhu aadka uga buuxaan waxaa lagu xakamayn karaa kiimikada wax lagu buufiyo marka lagu jiro wakhtiga guga, iyadoo laga yaabo in mar dambe loo baahdo wakhtiga xagaaga ah marka ay soo biqlayaan. Wixii macluumaad dheeraad ah, la xiriir Barnaamijka Xakamaynta Cawska Sunta ah.

## Suuro galnimada in la isku qaldo:

**Geedka giant hogweed waxaa mararka qaarkood lagu qaldaa geedka dhulka loogu yimid ee cow parsnip (*Heracleum maximum*), iyo sidoo kale noocyada karootada duurka laga helo ee malaha meelo kale laga keenay(*Daucus carota*) iyo geedka ee sunta ah ee hemlock (*Conium maculatum*).**



*Geedka cow parsnip waxay si aad ah iskugu eg yihiin geedka giant hogweed, laakiin sida caadiga ah wuxuu dhererkiisu gaaraa 4-7 feet, isaga oo leh ubax yar oo isku ururrsan oo jilicsan, oo is dhaafdhaafsan, oo leh timo dhalaalaya, oo ay ka mid tahay dusha sare ee caleemaha ku yaala hoosta. Sidoo kale, iniinyihiisu waxay leeyihiin qaabka wadnaha oo kale. Sida geedka hogweed oo kale, wuxuu keeni karaa gubasho, sidaa darteed* **iska illaali in uu ku soo gaaro dheecaanku.**



*Ubaxa karootada duurka laga helo wuxuu u eg yahay ka geedka gaint hogweed, laakiin geedkani wuxuu dhererkiisu gaaraa 3.*



*Geedka sunta ah ee hemlock waxaa lagaga garan karaa geedka giant hogweed waa jiridiisa aan timaha lahayn iyo ubaxiisa yar ee isku urursan ee geed kastaa leeyahay.*



**206-477-WEED (206-477-9333) or TTY: 711**
**kingcounty.gov/weeds noxious.weeds@kingcounty.gov**

King County

"geedka cow parsnip Heracleum maximum" sawir qaadeyaal Paul Asman iyo Jill Lenoble / CC BY 2.0. "Daucus carota" sawir qaade Andreas Rockstein / CC BY 2.0.
Diiwaanka: NoxWfact-Giant-Hogweed-2018.indd